



# Su'aalaha inta Badan La iska Waydiiyo (FAQs) ee Codsiga Liistada Sugitaanka ee Fresh Bucks

## Codsiga Liistada Sugitaanka

### Waa maxay Codsiga Liistada Sugitaanka ee Fresh Bucks?

Codsiga Liistada Sugitaanka ee Fresh Bucks waa fursad qoysaska Seattle ay ku codsadaan fursad ay ku helaan \$40/bishii faa'iidooyinka Fresh Bucks. Dadka deegaanka Seattle ee u qalma dakhliga ee soo gudbiya arjiga waxaa la gelin doonaa liistada sugitaanka waxaana la ogaysiin doonaa isdiwaangelinta marka miisaaniyad la helo.

### Sidee ayaan u codsadaa liistada sugitaanka ee Bucks Fresh?

Waxaad ka codsan kartaa onlaynka adigoo isticmaalaya websaytka Fresh Bucks. Codsigu wuxuu ahaan doonaa mid furan mustaqbalka la arki karo si aad u codsan karto wakhti kasta.

### Waa maxay macluumaadka ayaan u baahanahay si aan u codsado?

Macluumaadka soo socda ayaa loo baahan yahay qayb kamid ah codsigaaga:

- Imisa qof ayaa gurigaaga jooga?
- Waa maxay dakhliga qoyskaaga?
- Waa maxay cinwaanka deegaanka gurigaaga?

### Yaa u qalma?

Qoysaska Seattle ee buuxiya shuruudaha dakhliga oo ku nool xadka magaalada waxay u qalmaan Fresh Bucks. Isticmaal [aalada](#) si loo eego haddii aad ku nooshahay gudaha xadka magaalada.

### Qoyskaygu ma codsan karaa dheefaha badan ee Fresh Bucks?

Dheefaha waxay ku kooban yihiin hal qoys qoyskiiba. Haddii qof qoyskaaga ka tirsan uu hore u diiwaangashanaa, codsiyada dheeraadka ah lama aqbali doono.

### Sidee ayaan ku ogaan karaa in la i xushay?

Hadii codsigaaga la doorto, waxaa si toos ah lagugu ogaysiin doonaa boostada iyo iimaylka. Wakhtigaas, waxaanu ku ogaysiin doonaa wakhtiga saxda ah ee wakhtiga aad bilaabi doonto inaad hesho dheefaha Bucks Fresh.

### Haddii aan la i dooran, miyaan dib u codsan karaa?

Maya. Haddii codsigaaga aan la dooran wareegga koowaad, codsigaagu wuxuu ku sii jirayaa liistada sugitaanka ee fursadaha is-diiwaangelinta mustaqbalka, oo fursadahaagu way kordhaan wakhti kadib.



## Maka fiirin karaa xaalada codsigayga?

Waxaan kuugu soo ogaysiin doonaa boostada iyo iimayl hadii heerka codsigaagu isbadalo. Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa 206-256-5438 ama [freshbucks@seattle.gov](mailto:freshbucks@seattle.gov) si aad u hesho wargalinada.

## Maxaa dhacaya haddii duruufahaygu isbadalaan inta aan ku jiro liistada sugitaanka?

Haddii xaalada qoyskaagu isbadasho (tusaale, ciwaanka, dakhliga, iwm), fadlan nagala soo xiriir 206-256-5438 ama [freshbucks@seattle.gov](mailto:freshbucks@seattle.gov) si aad u cusboonaysiiso codsigaaga.

## Waa maxay sababta ay u jirto liistada sugitaanka?

Waxaa jira liistada sugitaanka sababtoo ah Fresh Bucks ayaa leh maalgalin xadidan waxayna u adeegi kartaa oo kaliya tiro go'an oo qoys ah markiiba. Liistada sugitaanka waxa uu u ogolaanayaa barnaamijku in uu si cadaalad iyo sinaan ah u maareeyo baahida barnaamijka isaga oo isticmaalaya nidaamka xulashada aan kala sooca lahayn.

## Habraaca Doorashada Codsiga

### Sidee ayuu u shaqeeyaa habraaca xulashada?

Habraaca xulashada ayaa si aan kala sooc lahayn u doorta qoysaska u qalma dheefaha Bucks Fresh. Qoysaska mudnaanta leh waxay helayaan gelis dheeraad ah doorashada, iyaga oo kordhinaya fursadooda doorashada sida soo socota:

- Haddii aad la kulanto 1 shuruudood oo mudnaanta leh, magacaaga waxa la galiyay 2 jeer.
- Haddii aad buuxiso 2 shuruudood oo mudnaan leh, magacaaga waxaa la galinayaa 3 jeer, iyo wixii la mid ah.
- Qoysaska ku haray liistada sugitaanka kadib xiliga isdiiwaangalinta koobaad waxay helayaan gelitaan dheeraad ah oo mustaqbalka ah.

### Waa maxay shuruudaha mudnaanta leh?

Fresh Bucks waxay hiigsanaysaa inay baabi'iso kala duwanaanshiyaha helitaan cunto caafimaad leh ee kuwa aadka u culeeska cunno yarida, dhibaato dhaqaale, iyo cudur daba-dheeraad ah oo la xiriira cuntada. Xogtu waxay muujinaysaa in qoysaska dakhligoodu hooseeyo iyo bulshooyinka madawga ah ay aad ugu dhowdahay inay la kulmaan hubanti la'aan cunto. Mudnaanta waxaa la siiyaa qoysaska buuxiya shuruudaha soo socda:

- Qaybta dakhliga qoyska ugu hooseeya leh.
- Qoysaska aan Ingiriisiga luuqadoodu ahayn.
- Mudada liistada sugitaanka: qoysaska ku sii jira liistada sugitaanka kadib xiliga isdiiwaangalinta koobaad waxay heli doonaan gelitaan dheeraad ah hababka xulashada xiga.